

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA <i>E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com</i>		
Sanadka: 2aad	Cadadka: 10aad ee September	Taariikh: 07/12/2013
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.</i>		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA</p> <p>BAARLAMAANKA IYO XEER</p> <p>NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p>1) Dhaqan-galka Miisaaniyad Sanadeedka 2014ka, Xeer Lr.0369/2013</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER</p> <p>NIDAAMIYAYAASHA</p> <p>IYO</p> <p>DIKREETOYINKA</p> <p>MADAXWEYNAHA:</p> <p>2) SOOMA BIXIN</p>	<p>785</p> <p>793</p>
--	-----------------------

QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,

WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER

NIDAAMIYAYAASHA

WASIIRADA, IWM



- 3) **WAR MURTIYEED** : War Murtiyeed ay si wadajir ah u soo sareern Wasiirka Wasaarada Arimaha Gudaha J.S.L Wasiirka Wasaarada Beeraha J.S.L iyo Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Guuraaga J.S.L, **795**
WAR MURTIYEED, 11/2013
- 4) Diiwaangalin Institute of Education and Research, **796**
WAREEGTO WASIIR, Wasaarada Qorsheynta Qaranka iyo Horumarinta 11/2013
- 5) Diiwaangalin Inter-Somali Institute for Research and Development, **797**
WAREEGTO WASIIR, Wasaarada Qorsheynta Qaranka iyo Horumarinta 11/2013 **798**
- 6) Diiwaangalin Insitute of Research Dialigue, **800**
WAREEGTO WASIIR, Wasaarada Qorsheynta Qaranka iyo Horumarinta 11/2013 **802**

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &

GO'AANADA MAAMUL

803

805

7) Diiwaan Gelin Shirikada Amoud Express, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	806
8) Diiwaan Gelin Shirikada Sanaag Sea Food Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	808
9) Diiwaan Gelin Shirikada Rayan Engineering and Construction Company (RECCO), <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	810
10) Diiwaan Gelin Shirikada Bilaal Project Consultancy, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	812
11) Diiwaan Gelin Shirikada Horn of Africa , <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	813
12) Diiwaan Gelin Shirikada Horizon Institute, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	815
13) Diiwaan Gelin Shirikada Conqor Fishing, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	817
14) Diiwaan Gelin Shirikada Gaafane Group Of Companies, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	817
15) Diiwaan Gelin Shirikada Burale Minerals Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	818
16) Diiwaan Gelin Shirikada MIA New Port Management Consultance Service, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	820
17) Diiwaan Gelin Shirikada Bilan Construction And Contracting Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	820
18) Diiwaan Gelin Shirikada Somalialand Fire Safety Company (SFSCO), <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	732
19) Diiwaan Gelin Shirikada Sesame Oil Production Company (SOPCO), <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	732
20) Diiwaan Gelin Shirikada East African Research and Development, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	734
21) Diiwaan Gelin Shirikada Faaco Construction and Contracting	734

Company,
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
22) Maxkamadda Degmada Hargeisa ee
Waaxda. / M.Haybe
Ogaysiin Dacwaysane



QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA

23) SOOMA BIXIN



QAYBTA KOWAAD:
XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER
NIDAAMIYAYAASHA:

REPUBLIC OF  **OMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2172/112013

DATE.....24/11/13

XEER MADAXWEYNE Lr: 0369/11/2013

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka

2014-ka

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Oodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Oodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay:

Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan Lr. GW/WAK/04/147/2013 ee ku taariikhaysan 04/11/2013 ee ay ku ansixiyeen Miisaaniyadda Sannadka 2014-ka ee Dawladda Dhexe, Dawladaha Hoose, Baanka Dhexe, Dekedda Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Haamaha Shidaalka Berbera, Warshadda Laydhka ee Hargeysa, Warshadda Laydhka ee Berbera, Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada iyo Deeqda Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF) ee 2014-ka;


Wuxuu Soo Saaray

A. Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2014-ka ee Dawladda Dhexe, Dawladaha Hoose, Baanka Dhexe, Dekedda Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Haamaha Shidaalka Berbera, Warshadda Laydhka ee Hargeysa, Warshadda Laydhka ee Berbera, Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada iyo Deeqda Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF).

B. Soo Jeedin Wax Ka-beddelid Go'aamada Ku lifaaqan Go'aanka Ansixinta Miisaaniyadda Dawladda ee 2014-ka:

Aniga oo tixraacaya qoraalka summaddiisu tahay GW/G/04/150/2013 ee ku taariikhaysan 05/11/2013 ee ujeedadiisu tahay soo gudbin Go'aanka Ansixinta Misaaniyadda Dawladda ee 2014-ka iyo lifaaqyadiisa. Sidaas darteed, waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa

soo jeedin wax ka-beddel ku saabsan qodobbada Saddexaad iyo Afaraad ee Go'aanka Ansixinta Miisaaniyadda ku lifaaqan, kaas oo nuxurkiisu yahay sida:



Qodobka 3aad oo ka waramaya Go'aamada ku lifaaqan Miisaaniyadda waxaa lagaga hadlay Faqradiisa 1aad in Hay'adaha ku jira Miisaaniyadda Dawladda Dhexe ee 2014 ee aan Golaha Wakiillada loo soo gudbin Xeerarkooda lagu aasaasay in (90) Cisho gudahood loogu soo gudbiyo Golaha.

Hay'adda Dhawrista Tayada ee ku xusan go'aanka Ansixinta Miisaaniyadda Dawladda ee 2014 waxa aanu idiinku soo gudbinaynaa xiligii aad cayinteen (90 Cisho), qiimayn ka dib Hay'adda ICT waxaan mudadaa ku hoos geyn doona Wasaaradda ay khusayso.

1. Hay'adda Xidhiidhka Raashinka Qaranka.
2. Hay'adda Qurbo-joogga.
3. TV-ga Qaranka.
4. Guddida Baadhista Xasuuqa Qaranka

Haddaba Mudane Guddoomiye, waxaan kugu baraarujinayaa in:

1. Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka Qaranka (FCA) la hoos-geeyey Wasaaradda Dib-u-dejinta, waxaana lagu hoos-geeyey Xeer Madaxweyne oo summadiisu tahay JSL/M/XERM/249-1574/022013, kuna taariikhaysan 04/02/13.
2. TV-ga Qaranka la hoos-geeyey Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyi-gelinta, waxaana lagu hoos-geeyey Xeer Madaxweyne oo summadiisu tahay JSL/M/XERM/249-1288/082012, kuna taariikhaysan 31/08/2012.

3. Hay'adda Qurba-joogga la hoos-geeyey Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, waxaana lagu hoos-geeyey qoraal Madaxweyne oo sumyadiisu tahay JSL/M/WAD/223-318/012011, kuna taariikhaysan 16/01/11.
4. Hay'adda Baadhista Xasuuqa Qaranka la hoos-geeyey Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka, waxaana lagu hoos-geeyey qoraal Madaxweyne oo sumyadiisu tahay JSL/M/WM/240-908/012012, kuna taariikhaysan 05/02/2012.

Dhamaan Hay'adaha Dawladda iyo wada shaqayntooda waxaan ku geexnay Xeerka Government Organisational Act oo aan dhawaan idiin soo gudbin doono.

5. Sida ku xusan Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2011 qodobka 25aad, Faqradiisa 7aad oo u dhigan sidan "Guddida Diwaangelinta Ururrada Siyaasadda iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka ayaa Xisbiyada dhexdooda ku ilaalinaya dimuqraadiyada, iyagoo warbixintooda u soo gudbinaya Golaha Wakiillada marka loo baahdo" iyo Qodobka 29aad ee Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2011 oo ka waramaya in Guddida Diwaangelinta Ururrada iyo Ansixinta Axsaabta Qaranku u xilsaaran tahay xalinta khilaafaadka soo kala dhex-gala Ururrada iyo Xisbiyada.

Faqradaha 3aad, 4aad iyo 5aad ee isla Qodobka 3aad arrimahay ka hadlayaan waa arrimo maamul oo dabeecad ahaan ka baxsan xilka xeer-dejineed ee Golaha Wakiillada, sababtoo ah sida ku xusan Qodobka 54aad ee Dastuurka, Goluhu wuxuu leeyahay jiddaynta qaadista cashuuraha iyo takiiifita maaliga ah, laakiin maamulka, fulinta iyo kala hormarintu waa xilka Xukuumadda.

Faqradaha 6aad iyo 7aad ee Qodobka 3aad waxay ka baxsan yihiin Qodobka 55aad ee Dastuurka oo ka waramaya Miisaaniyadda, wax xidhiidh ahna lama laha Miisaaniyadda, laakiin Golaha awood buu u leeyahay in uu Wasiirrada u yeedho, kana xog-waraysto markuu doono xilka ay Qaranka u hayaan, maadaama ay soo hoos-gelayaan Qodobka 53aad ee Dastuurka Faqradiisa 4aad.

Ugu dambayntii, talo-soo-jeedinta ku xusan Qodobka 4aad ee Go'aanka Golaha oo hoos imaanaya Faqradda 4aad ee Qodobka 53aad ee Dastuurka, waad ku mahadsan-tihiin, waanan tixgelinaynaa wixii suurta gal ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Ref: GG/wak/04/147/2013

Date: 04/11/2013

**GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2014ka,
IYO LIFAAQYADADA KU LAMAAN.**

MARKUU ARKAY:	Qodobada 54 ^{aad} iyo 55 ^{aad} ee Dastuurka Qaranka.
MARKUU ARKAY:	Qod.3aad ee Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada Faq. 4aad.
MARKUU DHEGAYSTAY:	Xog-waranka Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu ku ifitiimiyay odoroska miisaaniyadda Dawladda ee 2014da.
MARKUU DHEGAYSTAY:	Xog warankii, Soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi Hoosaadka Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyadda ee Golaha Wakiilada.
MARKUU DHEGEYSTAY:	Dooda Mudanayaasha ee odoroska Miisaaniyadda 2014.
MARKUU KA DOODAY:	Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadu ka kooban tahay.
MARKUU U CODEEYAY:	Ansixinta odoroska Miisaaniyada Dawladda ee sanadka 2014-ka iyo go'aamada iyo talooyinka ku lamaan. Kal-fadhigi 22 ^{aad} fadhigisi 33 ^{aad} ee 13/10/2014 oo ay goob joog ahaayeen 61 Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

**WUXUU COD AQLABIYADA AH (59 COD) OO GACANTAAGA
AH KU ANXIXIYAY.**

1. Odooroska Miisaaniyada Dawlada dhex, Dawladdaha Hoose, Baanka dhexe, Wakaaladda Dekeda Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Hamaha Shidaalka Berbera, Warshada Laydhka ee Hargeysa, Warshada laydhka ee Bebera, Madbacada Qaranka, Wasaaradda Dulista iyo hawada, Deeqda Sanduuqa horumarinta Somaliland(SDF) ee 2014ka. Oo qadarkeedu dhan yahay 1,276,033,716,000/= (Hal tirilyan labo boqol iyo todoba iyo lixdan bilyan iyo saddex iyo sodon milyan iyo todobo boqol iyo lix iyo toban kun Shillin) iyo Siyaasada Guud ee Miisaaniyadda.

Website: www.Somalilandparliament.net



2.

Miisaaniyadda Dawladda Dhexe	912,000,000,000
Miisaaniyadda Dawladdaha Hoose	129,836,638,953
Miisaaniyadda Baanka Dhexe	20,451,754,117
Miisaaniyadda Wakaaladda Dekedda Berbera	47,853,824,820
Miisaaniyadda Wakaaladdaha Biyaha	44,145,606,159
Miisaaniyadda Haamaha Shiidaalka Berbera	17,478,768,000
Miisaaniyadda Warshada Laydhka ee Hargeysa	15,915,301,864
Miisaaniyadda Warshada Laydhka ee Berbera	2,687,243,003
Miisaaniyadda Madbacada Qaranka	2,721,646,530
Wasaaradda Duulista & Hawada	1,942,926,300
Sanduuqa Hortumarinta Somaliland (SDF)	81,000,000,000
Isugeyn	1,276,033,716,000/=

3. Go'aamada ku lamaan ee lagu Ansixiyey Miisaaniyadda:-

- 1) In Hay'adaha ku jira miisaaniyadda Dawladda dhexe ee 2014 ee ann Golaha Wakiilada loo soo gudbin xeerarkii lagu aasaasay loogu soo gudbiyo Golaha Sagaashan (90) Cisho gudahood. Hay'addaha aan la soo gudbin xeerarkoodana la hakiyo Sii deynta miisaaniyadooda ilaa inta Golaha loo soo gudbinayo Xeerarkooda:-
 1. ICT Commission
 2. Ha'yadda Nidhiidka Raashiinka Qaranka
 3. Ha'yadda Qurbo Jooga
 4. Ha'yadda dhawrisa Tayadda
 5. TV-ga Qaranka.
 6. Gudidda Baadhista Xusuuqa Qaranka.
- 2) In Miisaaniyadda laga saaro Hay'adaha sharciyadooda ama muddo xileedkoodu dhamaaday sida Gudidda Diiwaangalinta ururada Siyaasadda iyo Anxiinta Axxaabta Qaranka.
- 3) In laga bilaabo odoraska Miisaaniyadda 2015 la goboleeyo Miisaaniyadda dawladda dhexe.
- 4) In qaybta loogu talo galay mashaariicda horumarinta 2% gobolada hari iyaga oo mashaariicaysan ka muuqato Miisaaniyadda Qaranka laga bilaabo 2015.
- 5) In lacagta loogu talo galay horumarinta wadooyinka la mashruuceeyo laguna muujiyo jaantus muujinayo lacagta wadooyinka kala duwan loogu qoondeeyey.

- 6) In uu Goluhu uu hor yimaado Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu si uu sharaxaad dheeraad ah uu Golaha uga siiyo baahida keentay abuurista khasnadda Guud ee Qaranka uguna iftiimiyo madax xigayaasha khasnadda Guud ee Qaranka.
- 7) In uu Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta Qaranka Golaha Wakiilada hor yimaado si uu sharaxaad dheeraad ah uga siiyo dakhliga deeqa caalamiga (UK, Denmark) iy Mashaariicda laga maalgelinayo sanad Miisaaniyadeedka 2014 taas oo dhan \$ 13,500,000= (Saddex iyo toban milyan shan boqol kun oo Dollar keliya).


4. Talo soo jeediin.

Waxa Goluhu ku ansixiyey Miisaaniyadda Talooyinkan:-

1. In Siyaasadda Miisaaniyadda Qaranka 2015 mudanaan la siiyo Wasaaradaha wax soo saarka sida Xoolaha, Beeraha, Kallumeysiga iyo Deegaanka lana kordhiyo Miisaaniyadooda.
2. Inyada oo la eegayo heerka sicir bararka ee ka jira Somaliland in loo kordhiyo Ciidamada Qaranka iyo Shaqalaha 40% Mushaharkooda sanad Miisaaniyadeedka 2015.
3. In dib u eegis lagu sameeyo Miisaaniyadda Wasaaraddaha Maaliyadda, Madaxtooyada, Wasaaradda Warfaafinta, TV-ga Qaranka, Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada iyo Khasnadda Guud ee Qaranka.
4. In dhamaan Hay'adaha madax banaan ay mid kasta muujiso waxay ku soo kordhiso Miisaaniyadda Qaranka si ay u muuqato in ay Qaranka wax tar u leedahay oo aanay noqon Miisaaniyadahoodu dhakhli iyo kharaj isku sar go'aan oo keliya.

Ansixinta Miisaaniyada, go'aanka iyo talooyinka ku lamaan waxaa ka aamusay (hal mudane), Gudoomiyahuna muu codayn sida caadada ah.

Miisaaniyadani waxay dhaqan gelysna marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland soo saaro Digreetada dhaqangelinta.



Cabdirisaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

ALLAA MAHAD LEH




Md. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL



QAYBTA SADEXAAD:
WAREEGTOOYINKA, AMARADA IYO XEER
NIDAAMIYAYAASHA WASDIIRDA.IWM



Jamhuuriyada Somaliland

Republic of Somaliland

REF: WDHR/W/1/254/2013

Taariikh:05/11/2013

WAR MURTIYEED

WAR MURTIYEED AY SI WADAJIR AH U SOO SAAREEN

1. WASIIRKA WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA JSL ***Mudane: Cali Maxamed Waran Cadde***
2. WASIIRKA WASAARADDA DEEGAANKA IYO HORUMARINTA REER GUURAAGA JSL ***Marwo:Shukri Xaji Ismacil Bandare***
3. WASIIRKA WASAARADDA BEERAHA JSL ***Prof: faarax Cilmi Geedoole***

WAXA UU U QORNAA SIDA HOOS KU CAD:

Shir ay si wada jir aha Wasiirada Wasaaradaha sare ku xusan ay ku yeesheen xafiiska Wasiirka Wasaaradda Beeraha J.S.L, manta oo ay taariikhdu tahay 5/11/2013, kuna saabsanaa xaaladda khayraadka dhulka iyo xoojinta nabad gelyada Somaliland . Waxa ay isla garteen qodobada hoos ku xusan:

1. In maagii (Calaamadii) u dhaxeeyey dhul daaqsimeedka iyo dhul beereedka ee la sameeyey 1998 sidiisi yahay, qofkii dhul daaqsimeedka beer ka sameeystana ay sharci darro tahay, beri ka maalinna talaabo sharci ah laga qaadi doono.
2. In Wasaaradaha ay quseyso ku hawlanyihiin fulinta lana gudagali doona si dhaqso ah arrintaasi

ALLA MAHAD LEH

Mudane: Cali Maxamed Waran Cadde

Pro.Faarax Cilmi Geedoole

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Wasiirka Wasaaradda Beeraha

Marwo: Shukri Xaji Ismacil Bandare



Wasiirka Wasaaradda Deegaanka

Iyo Horumarinta Reet Guuraaga

Jamhuuriyada Somaliland



Republic of Somaliland

Wasaaradda Qorshaynta

Ministry of National

Qaranka iyo Horumarinta

Planning and Development

(WQQH) - Hargeysa

(MNPDP) - Hargeysa

Ref: WQQ&H/W/24/531/2013

Date: 21/11/2013

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY:

Xeerka Wasaarada

ISAGOO ARKAY:

Xeerka hayadaha
samafalka/Xeerka No: 43/2010

ISAGOO ARKAY:

Arjiga/codsiga uu keenay xafiiska
diwaangalinta hay'adaha
samafalka ee wakiilka u yahay
Mudane/Marwo: **Mubarik
Ibrahim Aar**

ISAGOO ARKAY:

Xeerka aas aaska Qodobka
12aad/29aad

ISAGOO ARKAY:

juwanka cashuurta dawlada lagu
bixiyey

ISAGOO ARKAY:

In la diiwaangaliyo lana siiyo
shahaadada **Institute of
Education and Research**

summadeedu
L.43.13.531.2013

tahay

Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta



Jamhuuriyada Somaliland



Republic of Somaliland

Wasaaradda Qorshaynta

Ministry of National

Qaranka iyo Horumarinta

Planning and Development

(WQQH) - Hargeysa

(MNPD) - Hargeysa

Ref: WQQ&H/W/24/532/2013

Date: 24/11/2013

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY:

Xeerka Wasaarada

ISAGOO ARKAY:

Xeerka hayadaha samafalka/Xeerka
No: 43/2010

ISAGOO ARKAY:

Arjiga/codsiga uu keenay xafiiska
diwaangalinta hay'adaha samafalka
ee wakiilka u yahay Mudane/Marwo:
Abdikarim Askar Hassan

ISAGOO ARKAY:

Xeerka aas aaska Qodobka
12aad/29aad

ISAGOO ARKAY:

juwanka cashuurta dawlada lagu
bixiyey

ISAGOO ARKAY:

In la diiwaangaliyo lana siiyo
shahaadada

**Inter-Somali Intitute for Research
and Development**

summadeedu tahay
L.43.13.532.2013

Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta



Jamhuuriyada Somaliland



Republic of Somaliland

Wasaaradda Qorshaynta

Ministry of National

Qaranka iyo Horumarinta

Planning and Development

(WQOH) - Hargeysa

(MNPDP) - Hargeysa

Ref: WQQ&H/W/24/533/2013

Date: 25/11/2013

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY:

Xeerka Wasaarada

ISAGOO ARKAY:

Xeerka hayadaha
samafalka/Xeerka No: 43/2010

ISAGOO ARKAY:

Arjiga/codsiga uu keenay xafiiska
diwaangalinta hay'adaha
samafalka ee wakiilka u yahay
Mudane/Marwo: **Maxamed
Hassan Kahiye**

ISAGOO ARKAY:

Xeerka aas aaska Qodobka
12aad/29aad

ISAGOO ARKAY:

juwanka cashuurta dawlada lagu
bixiyey

ISAGOO ARKAY:

In la diwaangaliyo lana siiyo
shahaadada

Institute Of Research Dialigue

summadeedu tahay
L.43.13.533.2013

Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta



QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/211/2013.

03/10/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AMOUD EXPRESS, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Xawaalada magaceedu yahay **AMOUD EXPRESS, Astaanteeduna tahay:- (Map-ka Aduunka oo dul yaala lacag)**, shaqadeedu tahay Adeega Xawilaada Lacagaha (Remittance Service), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 03/10/2013.

Allaa Mahad Leh.

(Xadan Axmed Aadan)


Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA

SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



XIG/JSL/221/2013.

27/10/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SANAAG SEA FOOD COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004

(Company Act of Somaliland)
saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaban Yahay SANAAG SEA FOOD COMPANY , **Astaanteeduna tahay:- (Kalluun)** shaqadeeduna tahay Kallumeysi (Fishing), xarunteeduna tahay Magaalada Ceerigaabo, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 27/10/2013.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/222/2013.


27/10/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-



Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, RAYAN ENGINEERING AND CONSTRUCTION COMPANY (RECCO), oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban:- **RAYAN**

**ENGINEERING AND CONSTRUCTION COMPANY
(RECCO) Astaantiisuna tahay:- (Mishiinka
Qaldada Laaqa)** shaqadeeduna tahay Dhismaha
(Construction), xarunteeduna tahay Magaalada
Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu
tahay 27/10/2013

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/223/2013.

27/10/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Caddeyn Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka (Firms).

Markuu arkay:- Qodobka 502aad ee Xeer Madaniga

Markuu arkay: - Xeerka Shirkad ku Magacaaban
BILAAL PROJECT CONSULTANCY
FIRM



Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay
saxeexeen.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan
Tahay Shirkadda ku magacaaban BILAAL PROJECT
CONSULTANCY FIRM, (**Astaanteeduna tahay:-**
Kubad Afar midab leh) shaqadeeduna tahay Adeega
la Talinta Ganacsiga (Business Consultancy),
xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga
bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 27/10/2013

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



ALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/224/2013.


27/10/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.



Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HORN OF AFRICA ENTERPRISES, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaban yahay HORN OF AFRICA ENTERPRISES, **Astaanteeduna tahay:-**

(Xarafka ugu horeeya shirkada oo qaarada Africa ku dhexyaal) shaqadeeduna tahay Soo Dejinta iyo Dhoofinta (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 27/10/2013



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/226/2013.

28/10/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HORIZON INSTITUTE, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban yahay HORIZON INSTITUTE, **Astaanteeduna tahay:- (magaca shirkada oo is hoos yaala)** shaqadeeduna tahay talo bixinta (Consultancy), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 28/10/2013

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L


JAMHUURIYADDA



ALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



XIG/JSL/227/2013.

28/10/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, CONQOR FISHING, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban yahay CONQOR FISHING, **Astaanteeduna tahay:- (Aar goosato iyo kaluun)** shaqadeeduna tahay Adeega Maaweelada Caruurta (entertainment Service), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 28/10/2013

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



ALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/232/2013.

03/11/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-



Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GAAFANE GROUP OF COMPANIES, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban yahay **GAAFANE GROUP OF COMPANIES, Astaanteeduna tahay :- (Magaca Shirkada oo sawir Libaax hoos yaalo)**

shaqadeeduna tahay Ganacsiga Guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 03/11/2013



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/229/2013.

5/11/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BURALE MINERALS COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban yahay BURALE MINERALS COMPANY, **Astaanteeduna tahay:- (Dhagaxaan Macdan ah)** shaqadeeduna tahay Xayeysiinta Ganansiga yar yar iyo Daabacada Boodhadhka (Advertising Service), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 5/11/2013

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/230/2013.

06/11/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Caddeyn Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka (Firms)

Markuu arkay:- Qodobka 502aad ee Xeer Madaniga.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magacaaban MIAD NEW PORT MANAGEMENT CONSULTANCY SERVICE.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban MIAD NEW PORT

MANAGEMENT CONSULTANCY SERVICE,
shaqadeeduna tahay Adeega la Talinta Maamulka (Management Consultancy),(Astaanta : Markab),
xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 05/11/2013

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



ALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/236/2013.

18/11/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta

Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BILAN CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda magaceedu yahay **BILAN CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Aqal saddex saqaf leh oo ay ku hoos qoran tahay magaca shirkada)** shaqadeeduna tahay Adeega Maamulka (Management Service), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 18/11/2013.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/238/2013.

24/11/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SOMALILAND FIRE SAFETY COMPANY (SFSCO), oo

ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.



Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magaceedu yahay **SOMALILAND FIRE SAFETY COMPANY (SFSCO), Astaanteeduna tahay :- (Calaamadu muujinaya Fire Exit)** shaqadeeduna tahay Ka Ganacsiga Qalabka Badbaadada dabka (Fire Safety Trading), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 24/11/2013

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/239/2013.

24/11/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha Dalka (Firms)

Markuu arkay:- Qodobka 502aad ee Xeer Madaniga.


Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda ku Magacaaban
EAST AFRICAN RESEARCH AND
DEVELOPMENT

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban **EAST AFRICAN RESEACH AND DEVELOPMENT CENTER, Astanteeduna Tahay** (Mapka Africa), shaqadeeduna

tahay Adeega la Talinta (consultancy Service), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 24/11/2013



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/240/2013.

24/11/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, FAACO CONSTRUCTION AND CONTARCTING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magaceedu yahay **FAACO CONSTRUCTION AND CONTARCTING COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Dhismayaal is daba yaala oo uu ku hoos qoran yahay magaca shirkadu) shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 24/11/2013

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka J.S.L



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Maxkamada Degmada Hargeysa ee Waaxda./M.Haybe

MDH/MH/DML/1261/2013

Date:17/11/2013

Ku: Radio Hargeysa.

Ku: Wargeyska Madaxa banana ee Geeska Africa.

OG: Garyaqaanka Guud

UJ: Ogeysiin Dacweysane

Maxkamada Degmada Hargeysa ee Waaxda M.Haybe, waxay ogeysiineysaa dacweysanaha magaciisu yahay **C/fataax Cawil Xaashi** oo ay hore u soo dacwaysy xaaskiisa faadumo Cabdi Xaadhi, Dacwadaasina ay ku saabsaneyd Fasakh guur.

Hadaba, waxa la ogeysiinayaa dacweysanaha in xukunkaasi ku dhacay dacweysanaha ambiilla uu xaq u leeyahay muddo 30 beri gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta la baahiyo.

Allaa Mahad leh

Max.ed Cabdi Kaahin
Garsooraha Maxkamada Degmada Hargeysa ee
Waaxda M.Haybe

